# DIASPORA DEPARTMENT

## WAR-MURTIYEEDKA TODOBAADKA QURBA-JOOGGA JSL 2025
(*Final Communique/Declarations from the Somaliland Diaspora Week 2025*)

**"Dib u qeexidda doorka qurba-joogga – in xawaalad-diruhu noqdo lammaane istaraatiijiyadeed"**
(*Redefining the Role of Diaspora from Benefactor to Strategic Partner*)
**August 2nd -5th, 2025, Guleed Hotel & Xarunta Dhaqanka ee Hargeysa**

Todobaadka Qurba-joogga Somaliland (*Somaliland Diaspora Week*) waa munaasibad loo cayimay in sannad walba todobaadka u horreeya bisha August lagaga hadlo arrimaha khuseeya xidhiidhka jaalliyadaha iyo dalka, iyo sida kor loogu qaadi karo ka qayb-galka qurba-joogga ee horumarinta qaranka. Waa qorshe la jaanqaadsan Siyaasadda Arrimaha Dibedda Somaliland, kana mid ah Siyaasadda Xukuumadda Waxqabad & Wadajir ee uu hoggaaminayo Madaweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, Mudane Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi, taas oo ka turjumaysa danaynta iyo ahmiyadda weyn ee ay xukuumaddiisu siinayso arrimaha qurba-joogga qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

Todobaadka Qurba-joogga Somaliland oo sannadkan koowaad halku-dheggiisa loo qaatay "**Dib u Qeexidda Doorka Qurba-joogga Somaliland"** waxaa uu ka koobnaa barnaamijyo waxku ool ah oo aan hore loogu qaban jirin qurba-joogga gaar ahaan xilligan xagaaga ee fasaxa sannad-dugsiyeedka oo ay tiro badan ku soo booqdaan dalkooda hooyo. Waxaa la qabtay shirweynaha qurba-joogga August 2-3, kaas oo ay ka soo qaybgaleen in ka badan 800 ergay ka socday jaalliyadaha Somaliland ee ku dhaqan 35 waddan oo caalamka ah. Waxaa ku lammaanayd shirka carwo-ganacsiyeed ay qurba-jooggu ku soo bandhigeen hal-abuurkooda, ganacsato iyo maalgashadayaal qaran-joog ahina ay kala qaybgaleen. Waxaa lagu soo xidhay shirka munaasibad si heer sare ah oo isugu jirtay caways iyo bandhig suugaaneed qabsoontay habeenimadii maalinta saddexaad ee Todobaadka Qurba-joogga Somaliland.

Waxaa lagaga hadlay shirka kor u qaadista doorka qurba-joogga ee dhinacyada siyaasadda arrimaha dibedda, diblamaasiyadda, maamulka, xidhiidhka caalamka, maalgashiga iyo hal-abuurka ganacsiga, horumarinta sharciyeed, maaliyadeed iyo hay'adeed ee uu ka-qaybgalka qurba-jooggu u baahan yahay, caqabadaha jira iyo tabashooyinka ay qurba-jooggu ka qabaan meelo kala duwan, iyo sidoo kale fursadaha badan ee yaalla dalka.

Waxaa lagu soo afmeeray barnaamijyadii loogu talo galay Todobaadka Qurba-joogga, maalinta dhaqanka & madadaalada qoyska (*Family Cultural Fun Day),* taas oo ahayd madal loogu soo bandhigay qurba-joogga, hiddaha iyo dhaqanka, Xarunta Dhaqanka Hargeysa, isla markaana lagaga dooday nidaaminta iyo qaababka ugu habboon ee looga faa;iidaysan karo xirfadaha aqooneed ee qurba-joogga, sidoo kale dhalinyarada qurbaha ku dhalatay in aanay luminin afkooda, dhaqankooda iyo haybtooda ummadeed.

Ka sokow qurba-joogga Somaliland, Todobaadka Qurba-joogga, waxaa kala soo qaybgalay Waaxda Qurba-joogga ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda Arrimaha Dibedda & Iskaashiga Caalamiga ah JSL furitaankii munaasibadda iyo muddadii ay barnaamijyada todobaadku socdeen, masuuliyiin ka tirsan xukuumadda dhexe, wasaarado iyo hay'ado dawli ah, dawladaha hoose ee Hargeysa, Berbera iyo Burco. mudanayaal baarlamaan ah, ganacsato iyo maalgashadayaal qaran-joog ah, qaar ka mid ah wakiillada Somaliland, iyo marti-sharaf kale.

**Qodobada War-Murtiyeedka ka soo Baxay Todobaadka Qurba-joogga Somaliland 2025**

1. Qurba-jooggu waxay uga mahad celiyeen Xukuumadda munaasibadda todobaadka qurba-joogga ee la soo kordhiyay iyo barnaamijyada kala duwan ee uu ka kooban yahay, waxaanay dhiirrigeliyeen in la joogteeyo, lana badiyo shirarka iyo madalaha noocan ah ee looga gol leeyahay kor u qaadista doorka qurba-joogga iyo iskaashiga;
2. Qurba-jooggu waxay cambaareeyeen gardarrada iyo faro-gelinta ay Soomaaliya ka waddo Sool Bari oo dhulka Somaliland ah, waxaanay si buuxda u taageersan yihiin go'aamadii ka soo baxay Shirkii Golaha Wasiirada JSL ee Sabtidii August 2, 2025;
3. Waxaa la bogaadiyay kaalinta ay qurba-jooggu kaga jiraan horumarka bulsho-dhaqaale iyo dhismaha qaranka muddo dheer sida xawaaladda ay qurba-jooggu u soo diraan dalka oo ka badan hal bilyan oo dollar sannadkii iyo saamaynta togan ee ay ku leedahay nolosha qoysaska badan ee hela xawaaladdaas iyo dhaqaalaha guud ee dalka, waxaana lagu taliyay in la abuuro hannaan maalgashi suurtageliya wax-wada qabsi iyo iskaashi ballaadhan oo ay qurba-joogga Somaliland ku yeeshaan dalka;
4. Waxaa loogu baaqay jaalliyadaha qurba-joogga Somaliland ee dacallada adduunka in ay xoojiyaan wadajirka iyo isku-duubnida dhexdooda, una midoobaan wax ku biirinta geeddi socodka horumarineed, ilaalinta iyo kor u qaadista danaha qaranka Somaliland;
5. Abaabulka jaalliyadaha, ururada xirfadleyaasha qurba-joogga, xoojinta xidhiidhka iyo isku-xidhka ururada jaalliyadaha iyo dardargelinta doorka firfircoon ee ay qurba-jooggu ka ciyaarayaan dadaallada aqoonsi-raadineed ee Somaliland;
6. Kor u qaadista jawiga maalgashiga, fududaynta adeeg bixinta, iyo xoojinta shuruucda iyo siyaasadaha ku tacaluqa arrimaha maalgashiga, dhiirrigelimaha (*Incentives*), helidda hantida dhulka, maamulka dhulka iyo xuquuqda hal-abuurka;
7. Nidaaminta iyo dardargelinta ka faa'iidaysiga xirfadaha iyo khibradaha aqooneed ee ku duugan qurba-joogga Somaliland, iyada oo la abuurayo kayd-xogeed la xidhiidha, isla markaana si ku haboon loo adeegsanayo tiknoolajiyadda casriga ah;
8. Tixgelin gaar ah oo la siiyo jiilasha yaryar ee qurbaha ku dhashay, iyada oo la xaqiijinayo barnaamijyo wacyigelineed iyo qorshayaal ku habboon oo laga yeesho;
9. Kor u qaadista wada-shaqaynta iyo isku-dubbaridka hay'adaha dawladda Somaliland gaar ahaan arrimaha khuseeya arrimaha ka-qaybgalka qurba-joogga Somaliland;
10. Aasaasidda Sanduuqa Qurba-joogga Somaliland (Somaliland Diaspora Trust Fund)';

11. Aasaasidda Golaha La-tashiga Qurba-joogga, golahaas oo noqonaya madal isku xidha jaalliyadaha qurba-joogga Somaliland iyo dawladda, kaas oo door ka qaadan doona fulinta siyaasadda iyo qorshayaasha xukuumadda ee ku aadan arrimaha qurba-joogga;
12. Tayaynta hawlqabadka xafiisyada wakiillada iyo/ama ergooyinka diblomaasiyadeed ee ku metela Somaliland dalalka muhiimka ah, si ay ugu adeegaan jaalliyadaha qurba-joogga Somaliland ee ku dhaqan dalalka fadhigoodu yahay.

"Lama Huraan Waa Dalkaaga Hooyo"

Allaa Mahad Leh

**Ugbaad Naasir Cumar**
**Agaasimaha Waaxda Qurba-joogga, WADIC**